

Ku socoto adiga ah daryeelhaye

Tababar (Prao) – diyaargarooow muhiim u ah nolosha shaqada iyo waxbarashada sii socota

Goordhaw waa xiligii uu ilmahaadu samayn lahaay tababar (Prao)!

Tababar (Prao) waxa loola jeedaa samaynta jihayn nolosha shaqada oo ay taasi tahay in ardaydu ay tijaabiyaan sida ay tahay in laga shaqeeyo goob shaqo. Dhamaan ardayda dugsiyada hoose dhexe, dugsiyada khaaska ah iyo dugsiyada hoose dhexe ee khaaska ah waxa ay samayn doonaan tababar (Prao) sanad dugsiyeedka 8 iyo/ama 9. Waxa ay ku qoran tahay sharciga iskoolka.

Si uu usamayn karo mustaqbalka doorasho wanaagsan waa muhiim in ilmahaagu helaan aqoonta ku saabsan suuqa shaqada iyo inay uhelaan waayo aragnimo badan ee qaybaha kala duwan ee xirfadda iyo laamaha. Tababar (Prao) waxay ka saacidaysaa ilmahaaga inuu aragti ka helo tan aqoonnada iyo kartiyada looga baahan yahay nolosha shaqada. Tusaale ahaan kartida waxa ay noqon kartaa inuu bilaabid iyo mas'uuliyad sameeyo. Sidaas daraadeed ayay tahay in dhamaan ardaydu usameeyn doonaan tababar (Prao).

Iskoolka iyo goobta shaqada waa ay isla shaqaynayaan si goobta tababar (Prao) ee ilmahaadu ay unoqoto mid haboon oo ammaan ah. Waxay tusaale ahaan noqon kartaa in loo qabto gacanyare ilmahaada taageere uga ah goobta shaqada iyo inuu hubiyo in shaqabixiyaha raacayo xeerarka jira ee ku saabsan waqtiga shaqada iyo bii'ada shaqada. Ilmahaaga waxa uu ka caymisan yahay dhanka iskoolka xiliga ay socdo tababarka (Prao).

Iskoolku waxa uu ka mas'uul noqonayaa inuu ilmahaadu si wanaagsan ugu diyaar noqdo xiligiisa tababarka (Prao). Inta badan ardayda waxa lasiiyaa howlo ay soo bandhigi doonaan marka ay dib ugu soo noqdaan iskoolka. Qaabkasoo uu dhanka saxiibada fasalka kaga helayo aqoonta goobaha kale ee shaqo iyo xirfadeed.

Ma doonaysaa inaad wax badan ka ogaato tababar (Prao), lasoo xiriir hagaha shaqada – iyo waxbarashada ee iskoolka ama macalin.

Shaqsig xiriirka ee iskoolka

Lumbarka telefoonka.....

Cinwaan e-mailka:.....

